**Xeerka Madaxweynaha Jamhuuriyadda 2 Disembar 1958, lamba 1131.**

**Wax ka baddalka Xeerka lagu dhisay Khasnadda wareegga lacagaha Soomaaliya.**

**MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADA**

Marka uu arkay qod. 4 ee Xeerka 30 Juun 1954, lamba. 677;

Marka uu arkay qod. 12 ee dekereetada Madaxweynaha Jamhuuriyadda 5 Maarso 1955, lamba. 371, iyadoo sharciga la soo sheegay oo ku saabsan hawl-socodsiinta dawladeed "Khasnadda waregga lacagta Soomaaliya";

Marka uu garowsaday baahida loo qabo in isbaddal lagu sameeyo xeerka Khasnadda wareegga lacagta Soomaaliya, oo lagu oggoladay dekereetada la soo xusay ee Madaxweynaha Jamhuuriyadda 5 Maarso 1955, lamba. 371;

Sida uu taliyay Wasiirada Khasnadda iyo arrimaha dibadda;

**WUXUU DEKEREETO KU SOO SAARAYAA**

Qodobada soo socda ee Xeerka Khasnadda wareegga lacagta Soomaalia, oo lagu oggolaaday dekereetada Madaxweynaha Jamhuuriyadda 5 Maarso 1955, lr.371., waxaa loo baddalay sida soo socota:

Qod. 1, waxaa lagu kordhiyay faqradda saddexaad ee soo socota:

Xeerka Khasnadda wareegga lacagta Soomaaliya waxay ku shaqeynaysaa laba qaybood oo kala gaara, mid lagu magacaabo " Qaybta soo saaridda" iyo mid kale oo ah "Qaybta Bangiga".

Qod. 2. Faqradda koowaad waxaa loo kala qaybiyay sida soo socota:

Khasnaddu xarunteeda guud waxay ka dhigan kartaa Muqdisho, laamo iyo wakiillo dalka Soomaaliya.

Qod. 5. Faqradda koowaad waxaa loo kala qaybiyay sida soo socota, laba faqradood oo kala gaara; faqradda labaad ee hadda jirta, waxaa laga saaray erayga ah " waa loo cusboonaysiin karaa"; waxaana lagu daraya faqrad lixaad:

“Guddoomiyaha Golaha Khasnadda waxaa soo xulaya Wasiirada Khasnadda iyo arrimaha dibadda isagoo u hoggaansan warqadda magacaabidda, arrimaha ku qoron qod. 4 ee dekereetada Madaxweynaha Jamhuuriyadda 22 5 Maarso 1955, lamba. 371.
Goluhun wuxuu ka koobanyahay:

a) lix xubnood oo laga kala soo xusho khubarada, oo labo uu soo magacaabo Wasiirka arrimaha dibadda iyadoo mid uu noqonayo ku-xigeenka guddoomiyaha, mid Wasirka arrimaha gudaha, mid Wasiirka ganacsiga dibadda, mid Bangiga Talyaaniga iyo mid Xaafiiska Talyaaniga ee sarifka;
b) affar xubnood oo uu soo magacaab Maamulka Wasaayadda Soomaaliya, marka la dhagaysto Xukuumadda Soomaaliya.
   Maamulka kama mid noqon karaan Golaha maamulka, tababarayaasha, baarayaasha, maamulayaash iyo karaaniyaasha urur-hantiyeedka amaahda ee ka shaqeya Soomaaliya.

Qod. 6, xarafka f) iyo g), waxaa loo baddalay sida soo socota:

“f” wuxuu go’aan ka gaaraa shuruucda iyo shuruudaha hawlgallada Wakaladda ku xusan qod. 15-bis ee dambe; haddii Wakaaladdu ay ka xilqaadaysa adeegyada khasnadda Maamulka Wasaayadda Talyaaniga ee Soomaaliya iyo Xukuumadda Soomaliya, xisaabaadka khasaaraha oo aan ka badnayn tobonkiiba hal deeqaha Maamulka Wasaayadda Talyaaniga uu u qoondeyay Soomaaliya iyo tobankiiba hal daqliga canshuuraha loogu talagalay Soomaaliya.

“g” wuxuu magacaabaa xarunta Hoggaanka Guud iyo xarumo, laamo iyo wakiillo laga dhiso Dalka Soomaaliya.

Xarafka “h” waxaa lagu mideeyay sida soo socota: wuxuu caddaynayaa sidoo kale xaaladaha sharci iyo dhaqaale ee shaqaalaha, oo uu ku jiro agaasimaha guud, wuxuuna go’aan ka gaaraa hab-dhismeedka, uu Wasiirku khasnaddauu oggolaado uuna ku waafaqo Wasiirka arrimha dibadda, isagoo shaqaalaynaya.

Xarafka “i” iyo l waxaa lagu baddalay sida soo socota:

“i” wuxuu magacaabaa afhayeenada gudaha iyo dibadda;

“l” wuxuu soo saaraa xeer nidaamiyeyaasha iyo habsami u socodka hawlgalada iyo adeegyada Khasnadda;
“m” wuxuu u soo jeediyaa hay’adaha shaqada ilbaadinta ku leh halbeegga canshuur dhimista iyo qaddimaadyada, wuxuu kalo go’aan ka gaaraa canshuur kasta iyo xaaladaha lagu dhaqayo shaqooyinka iyo curaarada;

“n” wuxuu go’aamiyaa curaarahaa saraakiisha, khasnajiyaasha iyo qaababka kale ee dammaanadda; wuxuu go’aamiyaa xannibaad ka saarista curaarta iyo joojinta qaababka dammaanadda la soo sheegay;

“o” wuxuu baaraa oo fuliyaa nidaamka miisaaniyadda sanadlaha, wuxuuna u soo gudbiyaa naxli-saarayaasha xisaabaadka iyo Wasiirada khasnadda iyo arrimaha dibadda si loo oggolaado

“p” wuxuu oggolaadaa heshiisyada keenaya warejinta maguurtooyinka iyo ka tanasuliyada, isfagardyada iyo bixinnada ku saabsan amaahda ka badan 4. 375.000 Liire wuxuuna ku dhawaaqaa dhamman heshiisyada kale iyo arrimaha sharciyeed oo ahmiyaddooda awgood guddoomiyaha ay la tahay in uu hoos imaanayo oggolaashahiisa;

“q” wuxu iqtiyaar u leeyahay in uu ka dhiso Muqdisho Guddi fulin, oo ka kooban agaasimaha guud iyo laba xubnood oo ay soo magacaabaan isla golahaas wixii ku siman awoodddiisa, iyadoo la wakiilan karo, marka ay habboontahay in la qaado tallaabooyinka caadiyan soo galaya awooddooda;

“r” wuxuu gutaa xilalka kale oo hadba loo igmado ee arrimaha lacagaha oo dalka Soomalia ay dani ugu jirto;

Qod. 8. faqradda koowaad waxaa loo baddalay sida soo socota:

“si uu ansax u noqdo go’aanka Golaha waa in ay goob joog ahaadaan ugu yaraan lix ka mida”.

Qod. 12. Faqradda I, II, iyo III waxaa loo baddalay sida soo socota:

“Guddiga naxli-baareyaasha xisaabaadka wuxuu ka koobanyahay shan xubnood oo joogto aha iyo laba aan joogto ahayn”.

Shanta naxli-baareyaasha joogtada waxaa soo kala magacaabaya mid Wasiirka arrimaha dibadda, labana Wasiirka Khasnadda kuwaaso mid uu Soomaaliya degganyahay, mid waxaa soo magacaabaya Wasiirka Ganacsiga dibadda iyo mid uu soo magacaabo Maamulaha Wasaayadda Soomaaliya ee Talyaaniga, marka uu dhagaysto Xukuumadda Soomaliya; kuwa aan joogtada ahayn waxaa soo kala magacaabaya Wasiirka Khasnadda iyo Maamulaha Wasaayadda Soomaalia ee Talyaaniga.

Naxli-baareyaasha xisaabaadka waxaa lagu soo magacaabayaa dekereeto Wasiirka khasnadda isagoo Wasiirka arrimaha dibadda ku waafaqayo, isla dekeretdaas waxaa lagu magacaabayaa Guddoomiyaha naxli-baarayaasha”.

Qod. 15. Sidaan ayaa loo baddalay:

Khasnaddu waa in ay yeelataa keyd dammaanadeed si ay ku soo saarto lacagta macdanta ah, hasayeeshe waa in lagu maalgaliyaa magaca Dawladda Soomaaliya ama lagu dammiintaa magaca Jamhuuriyadda Talyaaniga qiimaha ugu sarreeya ee soo saarista marka loo eego kharashka.

Qod. 15-bis. – “ Qaybteeda bangiga waxay ku qabanaysaa adeegyada hawlgallada soo socda:

1. Qiima dhimista kambiyaalaha iyo jeegagga bangiga, oo leh mudda ka-dhac aan ka badnayn saddex bilood, oo la siinayo urur-hantiyeedka amaahda ka hawlgalayay ugu yaraan lix bilood;
2. soo saarista jeegagga wareega ee bangiga;
3. maalgalinta magacyada guud ama leh dammaanad guud oo ka soo soo baxay Dalka Soomaaliya sidoo kale Jaaamhuuriyadda Talyaaniga ama mid ay iyadu damminatay intii ku siman xudduudka uu caddeeyay Golaha, kadib marka la dhagaystay Wasiirada Khasnadda iyo arrimaha dibadda;
4. soo gadashada iyo iibinta dahabka iyo lacagaha dahabka, kambiyaalaha iyo jeegagga loo dirayo dibadda iyo isticmaalka lacagaha dibadda ha ahaadeen xisaab socota ama magaca amarka koowaad;

5. adeegga keydka loo hayo, curaar ama qaab kale oo xannibaadyo;
6. adeegga curaaraha ku jira xisaabta socota iyo keydka, oo leh ama aan laayn dulsaar lagu gudi karo aragti ama leh muddo.

   Khasnaddu waxay kaloo qaban kartaa xitaa hawlgallada soo socda:

   a) iibsato ama dhisato dhismayaal ay xaafiisyadeeda u isticmaasho ama shaqaalaheeda;
   b) uruurinta loo uruurinayo dadka gaarka, shirkadaha iyo hay'aadaha damiirka ee magaca laga dalban karo Soomaaliya iyo dibadda, iyo guud ahaan adeegga loo qabanayo oo halis ku noqon kara dhinacyo saddexaad;
   d) adeegga khasnadda iyo sidoo kale adeegyo kale iyo xilal loo qabanyo Maamulka dalka Soomaaliya iyo Xukumadda Soomaaliya, oo ku dhisan heshiisyo gaara oo huffan.

Qod. 21. Faqradda labaad waxaa loo baddalay sida soo socota:

"waxqabadka ilbaadinta hawlgallada waxa ku saabsan wareegga lacagta caadiyan waxaa qabanaya xakameeye, oo marka uu maqanyahay ama ay jiraan uu xilkiisa qabanau ku-xigeenkiisa".

Xakameeyahu wuxuu sidaas ku soo galayaa ulajeeddo la xariirta ilbadinta kulamada Guddiga fulinta ee ku qoran xarfka q ee qod. 6.

Xakameeyuha iyo ku-xigeenkiisa waxaa soo magacaabaya Wasiirka khasnadda iyo Maamulha Soomaaliya.

Dekereetadaan waxay dhaqangalaysaa 1 Janaayo 1959.

Dekereetadaan, oo wadata niggaxa Dawladda, waxaa lagu biirinayaa Uruurinta Rasmiga ee xeererka iyo dekereetooyinka Jamhuuriyadda Talyaaniga.

Cid kastana waa ku waajib in ay ilaaliso una hoggaansanaato.

Taariikhda Roma, 2 Disembar 1958.

**GRONCHI - FANFANI --ANDREOTTI**

Waxaa hubiyay, Niggax-ilaaliyaha: **Gonella**

Laga diiwaangaliaya Hanti Dhowrka, maalinta 31 Disembar 1958.

Qoraallada Xukuumadda, diiwaanka lamba. 115, bogga lamba.170. -- **RELLEVA**